

## Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha – Soo koobida Luuqada Fudud

**Kaalmada Dhaqaalaha ee la Baxshay:** Valley Medical Center & Clinics ayaa bixisa kaalmada dhaqaalaha, oo lagu baxsho Xeerkeeda Kaalmada Dhaqaalaha, lana siiyo bukaannada u qalma ee aan awoodin inay bixiyaan qarashka xaalada degdega ah ama daryeelka caafimaadka ee lagama maarmaanka ah. Valley Medical Center & Clinics ayaa bixisa kaalmada dhaqaalaha ee bukaan kasta/dammaanad-qaadayaasha oo dakhliga guud ee qoyska gaaraayo ilaa 400% Heerka Fakhriiga ee Federaalka (FPL) waxaana lagu dabaqaa tirada qoyska kadib marka la dhameeyo caymis kasta oo dhinac sadexaad bixinaayo. Xarunta iyo/ama adeegyada xirfadda ee Valley Medical Center & Clinics:

- 0% - 300% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 100% ee kaalmada dhaqaalaha.

Adeegyada xarunta ee keliya leh taariikhaha isbitaal ka saarida oo ku beegan ama kadib Luuliyo 1, 2022, laguna baxshay Valley Medical Center & Clinics:

- 301% - 350% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 75% ee kaalmada dhaqaalaha
- 351% - 400% ee heerka FPL si loo helo qiimo dhimista 50% ee kaalmada dhaqaalaha

Qof u qalma kaalmada dhaqaalaha ayaan laga qaadi karin wax ka badan cadadyada caadiyan lagu qaado daryeelka degdega ah ama daryeelka kale ee caafimaad ahaan lagama maarmaanka ah.

**Shuruudaha U Qalmidda iyo Caawimaada la Bixiyo:** U qalmidda kaalmada dhaqaalaha ayaa lagu saleeyaa arimo badan ayna ku jirto nooca xanuunka iyo daryeelka loo baahan yahay, caymiska ama ilaha kale ee qarashka bixinaaya, dakhliga, tirada qoyska, iyo tixgelinno kasta oo gaar ah oo bukaanka ama dhakhtarku uu doonaayo inuu tixgeliyo.

Bukaannada doonaaya kaalmada dhaqaalaha waa inay ku dhaqmaan hanaanka codsiga Kaalmada Dhaqaalaha. Tan waxaa ku jira gudbinta bayaanka W-2 ee bukaanka, risiidyada hadda ee mushaarka, dhaqdhaqaaqa xisaabta bangigaga ama canshuur celintii dakhliga ee sanadkii hore, iyo iyo buuxinta hanaanka codsiga ee dhammaan ilaha la heli karo ee kaalmada, ayna ku jirto daryeelka la kaabo ee gobalka Washington.

**Sida loo Codsado Kaalmada:** Bukaanka ama qof kasta oo door ku leh daryeelka bukaanka, ayna jiraan xubinta qoyska ama dhakhtarka, ayaa sheegi kara walaacyada dhaqaalaha ee jira. Bukaanka ama dhinaca masuulka ka ah ayaa intaas kadib lagu dhiiri gelin doonaa codsiga caawimaada dhaqaalaha. Si loogu qalmo kaalmada dhaqaalaha, codsi ayaa lasoo gudbin karaa wakhti kasta ka hor inta aan xisaabtu helin go'aan maxkamadeed.

**Maxaa Lagu Heli Karaa Kaalmada:** Kaalmada dhaqaaluhu waxay ku kooban tahay daryeelka caafimaadka ee lagu baxshay Valley Medical Center & Clinics. Qarashaadka sida safarka, cuntada, hudheelka, iyo qalabka caafimaadka ee mudada shaqeeya ayaan ku jirin xeerka Kaalmada Dhaqaalaha. Lacagta daawooyinka ayaa loo dabooli karaa bukaannada ku jira qiimo dhimista kaalmada dhaqaalaha ee heerka 300% ee FPL oo ah 100% haddii uu qoro dhakhtarka Valley Medical Center & Clinics daawadana laga qaato farmashiyaha Valley Medical Center & Clinics (haddii la heli karo).

**Meesha aad Ka Helayso Nuqullada, Ku dirayso Dukumeentiyada iyo Macluumaadka Xiriirka:** Xeerka Kaalmada Dhaqaalaha ee Valley Medical Center & Clinics, Codsiga Kaalmada Dhaqaalaha, Khulaasada Luuqada Fudud, iyo Xeerarka Biilasha iyo Dayn Uruurinta bilaash ayaa lagu helayaa. Dukumeentiyadaan ayaa lagu heli karaa luuqado badan onlaynka, taleefanka ama si toos ah. Dukumeentiyadu waa kuwo onlayn ah oo aad soo degsan karto ama ka daabacan karto [valleymed.org/financialassistance](http://valleymed.org/financialassistance). Waxaad sidoo kale codsan kartaa nuqulka si toos ah ama waxaad ka wacaysa taleefanka.

Si aad u hesho codsiga Kaalmada Dhaqaalaha iyo dukumeentiga taageeraaya oo Ingiriis ku qoran, ama Isbaanish, waxaad hadda adeegsan kartaa MyChart si aad ugu dirto dukumeentiyadaada. Dhammaan codsiyada kale ee lasoo gudbiyo ayaa wali lagu soo gudbin doonaa boostada, fakiska, ama si toos ah. Macluumaad kasta oo loosoo gudbiyay ka baaraan degis ayaa loo tixgelin doonaa macluumaadka caafimaadka ee dhawrsan sida ku cad Sharciga Fududeynta Caymiska iyo Isla Xisaabtanka ee Caafimaadka (HIPAA).

|                                                                                                                                                                                                                                                                                                                         |                                                                                                                                                                                                                                                                                                                                      |
|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|
| <p><b>Valley Medical Center &amp; Clinics</b><br/>Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka<br/>P.O. Box 59148<br/>Renton, WA 98058-2148<br/>Taleefanka 425.690.3578<br/>FAKISKA 425.690.9578<br/>Isniinta-Jimcada 8:00 a.m. – 5:00 p.m.<br/><a href="http://mychart.valleymed.org/#mychart">mychart.valleymed.org/#mychart</a></p> | <p><b>Valley Medical Center &amp; Clinics</b><br/>Adeegyada Dhaqaalaha Bukaanka<br/>3600 Lind Ave SW, Suite 110<br/>Renton, WA 98057-4970<br/>Taleefanka 425.690.3578<br/>FAKISKA 425.690.9578<br/>Isniinta-Jimcada 8:00 a.m. – 5:00 p.m.<br/><a href="http://mychart.valleymed.org/#mychart">mychart.valleymed.org/#mychart</a></p> |
|-------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|--------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------------|